

REPUBLIC OF



SOMALILAND

**THE PRESIDENT**

REF: JSL/M/XERM/249-2232/122013

DATE 31/12/13

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0373/122013**

**Xeerka Adeegga Naafada ee Dhismayaasha**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 19aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: In deegaan ku xeeran dadka naafada ah u saamaxaynin in ay awood u yeeshan in ay hawlahooda u gudan karan si madax bannan;
- Markuu Garwaaqsaday: In dadka naafada ahi caqabado kala kulmaan Xarumaha Caafimaadka, Dugsiyada, Cibaadada, Goobaha Biyaha iyo Goobaha lagu shaqeeyo iyo dhammaan meel kasta oo dadku isugu yimaado uu ka helo adeeg dawladeed ama mid gaar loo leeyahay;
- Markuu Arkay: Xilka Xukuumadda ka saaran sidii wax looga qaban lahaa caqabadaha, isla markaana loo fududayn lahaa;

**Wuxuu Soo Saaray:**

**Qodobka (1)aad: Dhismaha Xarumaha Hay'adaha Dawladdu leedahay Ama Gaarka Loo leeyahay**

1. In dhammaan xarumaha loo dhiso ama loo dhisayo Hay'adaha Dawladda iyo kuwa Gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegyada dadweynaha noocay doonaanba ha noqdaane, Goobaha dadweynuhu ku kulmo ee cibaado, dhaqan, bulsho ama madadaalo; laga bilaabo marka Xeerkani dhaqan galo loo dhiso hab ama hannan u fududayn kara in dadka naafada ahi jog ahaan iyo sal ahaanba u geli karaan.
2. In dhammaan Xarumaha Hay'adaha Dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahayba ee bixiya adeegga iyo goobaha laysugu yimaado ay ugu talo-galaan meelo la dhigo Gaadiidka Curyaamiinta(Parking).

**Qodobka (2)aad: Fulinta Xeerka**

Fulinta Xeerkan waxaa u xil-saaran, isla markaana iska kaashanaya Wasaaradda Hawlaha Guud, Guriyeynta iyo Gaadiidka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Dawladaha Hoose ee Degmooyinka Dalka.

**Qodobka (3)aad: Dhaqangalka Xeerka iyo Dabaqaadiisa**

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu saxeexo Madxweynaha Jamuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**